

Ka qaybqaadashada waxbarashada ilmahaaga

Adiga oo noqonaya ka qaybqaate firfircoon ee waxbarashada ilmahaaga, waxa aad ka caawin doontaa inaad u diyaariso ilmahaaga guusha dugsiga iyo nololaha. Waxa aan rajaynaynaa inaad sii wadi doonto inaad kula hadasho oo aad ugu akhrido ilmahaaga luuqadaada hooyo marka aad guriga joogtaan. Ku hadalka luuqaddaada marka aad guriga joogtaan waxa ay siin doontaa ilmahaaga aasaaska barashada dugsiga, dadka yaryar kuwaasi oo ku qalinjabiya iyaga oo ku hadlaya laba ama ka badan oo luuqadood waxa ay heli doonaan fursado shaqo oo kabadan kana fiican kadib qalin jabinta.



Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad u baahan tahay macluumaad badan oo ku saabsan barnaamijyada MLE kuwaasi oo laga heli karo dugsigaaga, dadka jooga xafiiska dugsiga ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalahaaga.

Haddii aad hayso su'aalo dheeri ah ama aad u baahan tahay macluumaad badan oo ku saabsan doorashada barnaamijka saxda ah ee MLE ee ardaydaada, wac 720-423-2040. Shaqaalahayaga labada luuqadood ku hadlaa waxa ay diyaar u yihiin inay kugu xidhaan jawaabaha.

Fiidyawga Ikhtiyaarada Waalidka MLE

<https://bit.ly/2BnoCzB>

Khadadka MLE

720-423-2040


Websayt

mle.dpsk12.org

Somali

BARNAAMIJYADA DPS MLE

Ardayda Kuwaasi oo baranaya Ingiriisi



Kusoo dhawaw DPS!



DPS, luuqadaha iyo dhaqamada kala duwan kuwaasi oo ardaydeenu u keenaan fasalada waxa ay kobciyaan dugsiyadeena. Waa hanti kuwaasi, oo lagu daray xirfadaha Luuqadda Ingiriisiga, waxa ayna ka caawiyaan ardayda inay guul ka gaadhaan dugsiga iyo nolosha. Barnaamijyada Waxbarashadeena Luuqadaha Badan – ama MLE – waxa si gaar ah loogu talagalay inay ilmahaaga ka caawiyaan barashada Ingiriisiga isla markaana waxa ay barayaan maadooyinka sida akhriska, xisaabta iyo sayniska.

Barnaamijyada DPS MLE waxa ay ka caawiyeen kumanaan arday inay ku guulaystaan dugsiga waana in ay u diyaar garoobaan qalin jabinta koolejka iyo xirfada – ardayda kuwaasi oo sii jooga barnaamijka MLE ilaa ay u diyaar noqdaan inay u gudbaan fasalada muhiimka ah waxa ay helaan dhibco qalin jabin oo ka sareeya marka loo eego ardayda kuwaasi oo aan waligood galin barnaamijka MLE.

Waa maxay barnaamijyada MLE?

Dugsiga DPS waxa ay leeyihiin laba nooc oo muhiim ah oo ah barnaamijyada MLE, Labada Luuqadood iyo Ingiriisiga oo ah Luuqadda Labaad. Barnaamijyada labada luuqadood ee DPS waxa loogu talagalay ardayda kuwaasi oo luuqaddooda koowaad tahay Isbaanish waxa ayna bixiyaan barashada Isbaanishka iyo Ingiriisiga. Barnaamijyada labada luuqadood ee DPS waa TNLI (Barashada Luuqadda Aasaasiga ah ee Kumeel gaadhka ah) iyo Labada Luuqadood/Gelin.

Barnaamijyada Ingiriisiga ee Luuqadda Labaad waxa loosoo jeedinayaa ardayda kuwaasi oo ku hadla luuqadaha aan ahayn Isbaanish. Waalid ahaan, waxa aad

u dooratay adeegyada barnaamijka MLE ilmahaaga adiga oo isticmaalaya Foomka Oggolaanshaha Waalidka kaasi oo lagugu siin doono diiwaangelinta. Haddii adeegyada MLE aan laga helayn dugsigaaga, ilmahaagu waxa uu tagi karaa dugsiga MLE Zone. Xafiiskaaga dugsigu waxa uu bixin karaa macluumaad badan oo ku saabsan dugsiyada MLE Zone.

Luuqadda Ingiriisiga oo Luuqadda Labaad ah

Barnaamijyada Ingiriisiga oo ah Luuqadda Labaad (ESL, sidoo kale waxa la yidhaa “ELA-E”), dhammaan fasalada ilmahaaga waxa lagu bari doonaa Ingiriisi. Macalimiinta barnaamijkani waxa si gaar ah loogu tababaray inay ka caawiyaan ardayda inay bartaan Ingiriisiga marka ay baranayaan maadooyinka kale sida akhriska, sayniska iyo xisaabta. Dugsigaagu sidoo kale waxa uu bixin karaa taageero dheeri ah oo ah luuqaddaada iyada oo uu u dhigayo macalin dhalad ku ah luuqadda.

Intaa waxa dheer, ilmahaagu waxa uu heli doonaa 45 daqiiqo maalin kasta kaasi oo loogu talagalay in lagu dhiso says adag si uu u barto sida loogu hadlo loona qoro Ingiriisiga, lana yidhaa Horumarinta Luuqadda Ingiriisiga.

Si aad ugu doorato Ingiriisiga adeegyada Luuqadda Labaad, dooro IKHTIYAARKA 2 ee Foomka Oggolaanshaha Waalidka.